

Wargelin waalidiinta ku socota 11.11.2020

Lacagta barbaarin-horaadka: ka maqnaanshaha barbaarin-horaadka ee cunuggu ka maqanyahay xilliga karaantiilka qasabka ah waxaa lala barbardhigayaa maqnaanshaha jirrada

Magaalada Helsinki waxay go'aamisay 4.11.2020, in maqnaanshaha xilliga karaantiilka qasabka ah lala barbardhigo maqnaanshaha jirrada.

Ka maqnaanshaha cunugga ee xilliga karaantiilka qasabka ah uu ka maqanyahay barbaarin-horaadka iyo waxqabadka subaxdi iyo galabti ee waafaqsan sharciga waxbarashada aasaasiga ah waxaa lala barbardhigayaa maqnaanshaha jirrada. Saraakiisha caafimaadka ayaa qoraya gelitaanka karaantiilka.

Haddii uu cunuggu jirro darteed uga maqan yahay bil gudaheed barbaarin-horaadka ugu yaraan 11 oo waxqabad maalmeed ah, waxaa laga qaadayaa kala bar lacagta bisha. Lacagta macaamiisha lagama gudanayo, haddii uu cunuggu jirro darteed u maqanyahay dhammaan maalmaha waxqabadka ee bisha.

Soocelinta lacagaha waxaa xisaabta lagu daranayaa laga billaabo 4.11.2020, wixi ka horreeyay waa maya.

Lacagta macaamiisha ee caadiga ah ayaa laga soo dallacanayaa wakhtiga karaantiilka aan qasabka ahayn.

Macluumaad dheeraad ah:

Lacagta macaamiisha ee barbaarin-horaadka
Waaxda shaqada barbaarinta iyo waxbarashada
Wakhtiga telefoonku waa Isniin- Jimco, saacadda 9-11
tel. 09 310 8600 (sii gudbin)
varhaiskasvatus.maksut@hel.fi

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan bixinta lacagta macaamiisha waxay ku jiraan [bogagga shabakadda](#)